

BOOQASHADA DANJIRE COLOW EE XARUNTA CILMI BAARISTA IYO HORUMARINTA DALAGYADA BEERAHA

Jakarta 9 Janaayo 2009

Shalay oo ay taariikhdu ahayd 08/01/2009, ayaa Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia Mudane Maxamuud Colow Barow waxa uu booqasho ku tagay Xarunta Diyaarinta Abuurka Bariiska iyo Galleyda, ka dib martiqaad uu ka helay Madaxa Baarista iyo Horumarinta ee Xarunta Cilmi Baarista iyo Horumarinta Dalagyada Beeraha ee Indonesia.



Booqashadan oo ujeedadeedu ahayd u kuurgalida heerka farsamo ee ay gaarisiyeen cilmi baarista Indonesia waxsoosaarka dalagyada beeraha ayaa waxa uu Danjire Colow koormeer ku bixiyay qeybta horumarinta bariiska iyo galleyda oo ka mid ah dalagyada sida aadka ah looga beero

dhulka Soomaaliyeed. Indonesia oo sanadkan gaartay isku filnaansho xaga waxsoosaarka bariiska ah ayaa dadaal xoogan u gashay horumarinta abuurka beeraha.

Bariiska oo si aad ah looga isticmaalo wadankan Indonesia, ahaana sanadihii lasoo dhaafay mashaariicda ugu ballaaran ee dawladda iyo ganacsatada wadankan ay xooga saarayeen sidii isku filnaansho looga gaari lahaa ayay xaruntan cilmi baarista iyo horumarinta dalagyada beeraha ku guuleysatay sidii ay u diyaarin lahayd abuur horumarsan oo tayo wanaagsan leh.

Abuurkan baariiska ah ee ay diyaarisay xaruntan ayaa waxa uu gaarayaa waxsoosaarkiisa halkii Hekter 8 -10 TON, halka wadamo badan oo tacbada beeraha ay marayaan waxsoosaarka bariiska halkii Hekter 4 TON, taasoo Indonesia ka saaciday sidii ay u yareyn lahayd soo iibsashada bariiska oo xilligii hore ay ka keensan tahay wadamada deriska ah sida: Philippine iyo Vietnam oo ku hormaray dhoofinta bariiska.

Booqashada Danjire Colow ayaa sidoo kale waxa ay salka ku haysay sidii uu xarunta ugala hadli lahaa qaababka ay Soomaaliya uga faa'iideysan karto teknoolojiyadan ay Indonesia ku hormarinayso dalagyada beeraha, taas oo uu cadeeyay masuul ka socday Wasaaradda Beeraha oo ku wehliyay booqadasha in ay Xaruntu Diyaar u tahay sidii ay Soomaaliya uga saacidi lahayd helitaan abuur tayo leh iyo tababar xaga isticmaalka iyo fayodhowrka dalaga.

Gabagabadii booqashada ayuu Danjire Colow uga mahadceliyay Madaxda Wasaaradda Beeraha Indonesia iyo Xaruntaba sida wanaagsan ee ay ugu soo dhoweeyeen wax ka ogaashaha Cilmi Baarista Indonesia ee xaga dalagyada beeraha, isagoo sidoo ka dalbay in ay ka gacan qabtaan Soomaaliya horumarinta dalgyada beeraha, kuwaas oo ay Indonesia iyo Soomaaliyada isaga mid yihiin noocyo badan oo dalaga beeraha ah oo uu ay ugu horeeyaan Bariiska iyo Galleyda.



Booqashadan waxay billow u tahay qorshe sanadeedka cusub ee uu Danjiraha ku doonayo in uu dawladda Indonesia, hay'adeheeda kala gedisan ugu gudbiyo in baahida shacabka Soomaaliyeed aanay ku koobneyn dhanka siyasadda ee ay shacabka u baahan yihiin sidii looga horumarin lahaa dhanka waxsoosaarka dhaqaalaha, sida: Beeraha iyo Kalluumeysiga sidoo kale horumarinta bulshada sida: Waxbarashada iyo Tababar-Xirfadeedka wax ka taraya sare u qaadista waxqabadka bulsho.

[Safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia](#)
[Jl. Salak No. 5, Guntur, Jakarta Selatan 12980 Indonesia](#)
[Email: somaliemb@indo.net.id](mailto:somaliemb@indo.net.id)